

Oggolaanshaha Adeegyada Qorsheynta Qoyska

Codso si aad U hesho Adeegyada Qorsheynta Qoyska

Magaca _____

Lambarka Shaxda: _____

Waxaan halkan ku oggolahay in aan ka helo adeegyada caafimaadka iyo kuwa la xidhiidha shaqaalaha Barnaamijak Qorsheynta Qoyska ee North Dakota (North Dakota Family Planning, NDFPP) iyo in la isticmaali karo tignoolajiyada caafimaad ee ku baxaan habka fogaan araga.

Waxaan fahamsanahay in adeegyadan ay ku jiraan: dib u eegista taariikhdayda caafimaad; macluumaadka ku saabsan caafimaadka, waxbarashada iyo la-talinta; baaritaanka caafimaadeed; baaritaanka ku saabsan kansarka naasaha iyo ilmo-galeenka, caafimaadka maskaxda, Cagaarshowga C, khataraha hab-dhaqanka iyo cudurrada galmada lagu kala qaado oo uu ku jiro HIV; iyo gudbinada ku aadan daryeelka aan lagu bixin rugtan.

Waxaan fahamsanahay inaan xaq u leeyahay inaan helo adeegyada turjubaanka luqadda oo bilaash ah. Waxaan fahamsanahay in ay tahay in aan ugu sheego shaqaalaha haddii adeegyadani ay waxtar yeelan doonaan sida aan fahamkeyga ahaan ku qabo hab macluumaad qoraal ama hadal ahaan ah inta lagu jiro booqashooyinka daryeelka caafimaadkayga.

Waxaan fahamsanahay in la i siin doono macluumaadka ku saabsan baaritaanka(nada), habraaca(yada), daawaynta(nada), iyo hababka qorshaynta qoyska ka hor inta aan mid ka mid ah adeegyadan la i siin. Waxaan fahamsanahay in macluumaadkan ay ku jiraan faa'iidooyinka, khatarta, dhibaatooyinka ama cilladaha suurtagalka ah, iyo doorashooyin kale. Waxaan fahamsanahay inay tahay inaan weydiyo su'aalo ku saabsan wax kasta oo aanan fahmin.

Waxaan fahamsanahay in helitaanka adeegyada qorsheynta qoyska ay tahay mid ikhtiyaari ah. Waan bedeli karaa maskaxdayda ku saabsan helitaanka adeegyadan wakhti kasta. Wax dammaanad qaad ah layma siinin oo ku aadan natiijooyinka laga yaabo in aan ka dhaxlo adeeg kasta oo aan helo. Waan ogahay in aqbalaadda adeegyada Qorshaynta Qoyska aanay ahayn wax shardi u ah helitaanka adeegyada kale ee laga bixiyo goobtan.

Waxaan fahamsanahay in aan u qalmo in aan ka helo adeegyada rugta Qorsheynta Qoyska iyada oo aan loo eegin diintayda, qolodeyda, midabkayga, asalkayga, naafanimadeyda, da'deyda, jinsigeyga, nooc galmoodkeyga, aqoonsiga jinsigeyga, sifooyinka jinsigeyga, tirada uurar aan qaaday, heerka guurka ama awood la'aantayda ku aadan bixinta kharashka.

Waxaan sidoo kale fahamsanahay in adeegyadayda caafimaad iyo diiwaannadayda ay heli doonaan daaweyn qarsoodi ah. Diiwaanadayda caafimaad waxaa loo shaacin karaa dadka kale kaliya markaan bixiyo ogolaanshahayga oo qoran, ama sida kale ee uu sharcigu u baahan yahay sida ka warbixinta xadgudubka iyo dayaca ilmaha. Haddii baaritaanno laga qaado cudurrada galmada lagu kala qaado, uga warbixinta natiijooyinka togan ee baaritaannadaas hay'adaha caafimaadka dadweynaha ayaa sharcigu u baahan yahay. Waxaan fahamsanahay in diiwaanada caafimaadka ee Qorshaynta Qoyska laga yaabo in lala wadaago rugaha kale ee Qorshaynta Qoyska ee North Dakota si la iigu siiyo daryeelo kilinigyada kale ee Qorshaynta Qoyska ee aan doorto.

Saxiixayga ka muuqda foomkan waxa uu tilmaamayaa in aam helay ama la ii soo bandhigay koobi ah Ogeysiiska Hab-dhaqanada Qarsoonnimada. Waxaan fahamsanahay in aan codsan karo koobi ah Ogeysiiska Qarsoonnimada wakhti kasta.

Haddii booqashadeydu uu caymis daboolayo ama bixiyeyaasha kale ee qoloda saddexaad ah, waxaan u fasaxayaa NDFPP inay u sii daayaan macluumaadka caafimaadka ee lagama maarmaanka u ah si loo go'aamiyo dheefaha lagu bixin karo sheegashadan. Waxaan oggolaanayaa siinta faa'iidooyinka caafimaadka dhakhtarka ama alaab-qeybiyaha adeegyada la bixiyay. Waxaan fahamsanahay in aan dhaqaale ahaan mas'uul ka ahay biilkan iyadoo loo eegayo qaybta mushaharkayga iyada oo aan loo eegin daboolida caymiska. Waxa aan halkan ku cadaynayaa in aan akhriyay oona fahmay waxa kor ku xusan oo aan si mutadawacnimo ah u ogolaaday adeegyada iyo saadka ay bixiyaan rugtan caafimaadka.

Saxiixa Macmiilka